

Dib u habeynta Early Achievers Gu'ga 2017

Dalabka Heerka 2 ee la soo Gaabiyey

Early Achievers waxay meesha ka saareen dhawr tallaabo marka la eego bixiyayaasha ku shaqaynaya shuruudaha Heerka 2. Laga bilaabo horraantii Abriil 27, 2017, Sooyaalka Xarunta iyo Is-Qiimaynta Xarunta waxa laga suuliyey Dalabka Heerka 2. Dalabka la soo gaabiyey wuxuu kaqayb yahay dedaalada socda ee Waaxda Barashada Hore si loo hubiyo in qaybaha Early Achievers ay ku tacaaluqaan bixiyayaasha ayna gacan ka gaysanayaan natiijooyinka togan ee carruurta iyo qoysaska.

Sharuudaha Heerka 2 ee Hadda	Sharuudaha Heerka 2 ee la Fududeeyay
Diiwaanada Xirfadeed ee Hawlwadeenada	Diiwaanada Xirfadeed ee Hawlwadeenada
Sharaxaada Xarunta	Mar danbe looma baahna!
Taxanaha Tababarka Xirfadeed	Taxanaha Tababarka Xirfadeed
Is-Qiimeynta Xarunta	Mar danbe looma baahna!

Taageerooyinka Heerka 2 ee ay Heli Karaan Kaqaaybqaatayaasha

Waxa jira taageerooyin iyo khayraad badan oo la heli karo si looga caawiyo bixiyayaashu inay diyaariyaan qiimeyntooda goobta, oo ay kujiraan kuuska beddelka ee cusub iyo wakhti xaddidan [Deeqda Baahida Kusalaysan ee Dhammaystirka Heerka 2](http://del.wa.gov/EarlyAchievers-PreRatingToolkit). Wixii macluumaad dheeraad ah ee kusaabsan taageerooyinka Heerka 2, booqo bogga internetka ee del.wa.gov/EarlyAchievers-PreRatingToolkit.

Early Achievers Waxay Aqoonsadaan Bixiyayaasha Muctarifka ah

Laga bilaabo xagaagan, Early Achievers waxay siin doonaan aqoonsi bixiyayaasha muujiyey dadaal ku aaddan tayada iyaga oo adeegsanaya qoonsi-siinta qaranka. Wakhtiga qiimeyntu dhacayso, kaqaybqaatayaashu u-qalma waxay ku heli doonaan shan dhibcaha aqoonsi-siinta ah qiimayntooda, iyo sidoo kale Qaybta Aqoonsi-siinta ee Taqasuska Shahaadooyinkooda Early Achievers. Siyaasaddan waxay kaliya saamayn doontaa qiimaynta la sameeyo kadib marka siyaasaddan dhaqangasho. Baraha la qiimeeyay ee aqoonsiga ka qaatay hay'ado la aqoonsan yahay waxay mutaysan doonaan dhibcaha waafaqsanaanta aqoonsi-siinta qiimeyntooda xigta ee la muddeeyey, dib-u-qiimayn ama qiimaynta dib-u-cusboonaysiinta. Si ay u muteystaan, xarumuhu waa inay si buuxda aqoonsi uga haystaan hay'adaha si rasmi ah ay u qiimeeyeen Kooxda Dib-u-eegista Aqoonsi-siinta Early Achievers. Wakhtigaan, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta (National Association for the Education of Young Children, NAEYC), Ururka Qaranka ee Daryeelka Carruurta Qoyska (National Association for Family Child Care, NAFCC) iyo Ururka American Montessori (American Montessori Society, AMS) ayaa buuxiyey shuruudaha dalabka.

Wixii Cusub Dhibcaha Heerarka Tayada

Ballanqaadka Waaxda Barashada Hore ee hagaajinta kaqaybqaadashada Early Achievers waxay sii waddaa cusboonaysiin filiqsanaanta dhibcaha Heerarka Tayada. Laga bilaabo Luulyo 16, 2017, kaqaybqaatayaashu waxay awoodi doonaan inay helaan hal dhibic hirgalinta WaKIDS ama qiimaynta waafaqsanaanta (lagu muujiyay hoos), marka lagu daro dhibicda lagu helay isticmaalka qiimayn waafaqsan carruurta oo dhan. Sidaa darteed, tababarka Tilmaamaha Barashada Xilliga hore ee hawlwadeenada hadda waxay u qalantaa laba dhibcood, halkii saddexda dhibcood. Cusboonaysiinta waxay muujinaysaa shuruudo la mid ah waafaqsanaanta manhajka, iyo sidoo kale hawsha Waafaqsanaanta Heerarka ee socota.

Hawsha Muunad-qaadashada Faylka ee la Fududeeyey

Laga bilaabo Luulyo 16, 2017, ururiyayaasha xogtu waxay bilaabi dib-u-eegista saddex-dalool hal dalool, laakiin aan ka yarayn saddex, faylalka fasal muunad ahaan loo qaatay oo kasta inta lagu jiro qiimaynaha goobta. Wakhtigaan, ururiyayaasha xogtu waxay dib-u-eegeen 100% faylasha ilmaha ee fasallada muunad ahaanta loo qaatay.

Manhajka la Ballaadhiyey iyo Liisaska Qiimeynta

Ilaa markii Early Achievers bilaabeen 2012, bixiyayaashu waxay gudbiyeen caddayn si ay u muujiyaan waafaqsanaanta tilmaamaha manhajka iyo qiimaynta gobolka ilaa qalabka Manhajka iyo waafaqsanaanta WaKIDS. Iyadoo la kaashanayo Jaamacadda Washington, DEL waxay abuurtay liis manhajyada iyo qiimaynaha muujiyey waafaqsanaan. Bixiyayaasha isticmaalaya wax kamid ah manhajyada liiska kujira waxay heli doonaan hal dhibic manhajyada waafaqsan iyaga oon dhammaystiran Qalabka Waafaqsanaanta Manhajka. Sidoo kale, Heerarka Tayada la hagaajiyey waxay ka dhigan tahay in xarumaha isticmaalaya qiimaynaha liiska kujira ay heli doonaan hal dhibic marka ay isticmaalaan qiimayn waafaqsan una baahan maayaan inay dhammaystiraan qalabka waafaqsanaanta WaKIDS. Kaqaybqaatayaashu waxay si sahal ah ugu qori karaan macluumaadkan Qalabkooda U-diyaarsanida Qiimaynta Falgaleed oo ay tusi karaan ururiyayaasha xogta manhajyada ama qiimaynta wakhtiga lagu jiro la-socoshada goobta. Liisaskan waxa la cusboonaysiin halmar muddadiiba oo kaqaybqaatayaashuna waxay heli doonaan ogaysiin marka manhajyo/qiimayno cusub lagu daro. Marka lagu qalabyada waafaqsanaanta la soo gaabiyey iyo Heerarka Tayada la cusboonaysiiyey, liisaskan la ballaadhiyey waxay sahli doonaan hawsha waafaqsanaanta manhajyada iyo qiimaynta ee kaqaybqaatayaasha!